

TALAALKA JYNNEOS™ EE XIDIDKA IYO KAN JIIRKA LAGU DURO


JYNNEOS waa talaalka ka hortaga furuqa caadiga ah iyo furuqa daanyeerka (MPOX).

Waxaa lagu baxshaa labo kuuro, oo lagu dhufsto xididka ama jiidka midkood.

Haddii laga joogo ugu yaraan 28 maalmood ilaa maalintaadii koobaad, waa muhiim inaad qaadataa kuuradaada labaad si aad u hesho talaalka iyo difaaca buuxa.

CIRBADA XIDIDKA (ID)

- Waxaa lagu duraa hoosta maqaarka (jiirka) gacanta hore, garabka kore, ama dhabarka ka hooseeya caarada garabka.
- Waxaad buruq muuqata ku yeelan kartaa maqaarka hoostiisa, oo loo yaqaano “wheal.”
- Ciladaha ka dhalan kara cirbada xididka ayaa la mid ah kuwa cirbada jiidka laakiin waxay socon karaan muddo ka badan tan jiidka. Waxaa sidoo kale isbadeli kara midabka ama waxaad yeelan kartaa nabar kaaga yaala meesha laga duru.



CIRBADA JIIRKA (SQ)

- Ayadoo lagu duru maqaarka hoostiisa (cirbada maqaarka) oo lagu duru cududa. Tani waa qaabka ugu badan ee talaalka lagu qaato.
- Inta badan dadka ayaa xasaasiyada yar ka qaada talaalka (cilado ka dhasha). Doorarkaan waxaa ku jiri kara:
 - Xanuun, murmurux, barar, adkaan, ama cuncun kaa qabta meesha cirbada lagaaga dhufstay.
 - Xanuunka murqaha, madax xanuun, lalabo, qarqaryo, ama dareen daal ah.



Waxaad dooran kartaa kuuradaada talaalka in lagaaga dhufsto xididka ama jiidka.

Haddii kuuradaada koobaad ahayd mid hal nooc ah, waxaad dooran KARTAA hal qaab oo kale oo aad ku qaadata kuuradaada labaad.

Labada qaaba waxay ku siinayaan heer difaac oo iskumid ah oo ka dhan ah MPOX.

